

Fadlan nagala qeybgal habeenka filinka!

Ardayda, Qoysaska iyo Shaqaalaha Qaaliga ah,

Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS) waxay martigalineyaan munaasabado taxane ah oo diirada lagu saarayo Wada Lahaanshaha, Sinnaanta iyo U Wada Dhammaanshaha iyada oo halkaas lagu soo bandhigi doono shaashada weyn, dokumentiyaal helay abbaal-marin oo isku jiri doona, kicin leh, iyo iyada oo mid kasta oo inaga mid ah ay ka ho'a hor imaneyso arrimo ku saabsan waxa suurtagal ah nidaamyada aynu u sameynay caruurteena naafada ah.

Qeybo ka mid ah taxanayaashani, waxaan aad ugu faraxsanahay inaan kugu soo dhaweyno munaasabad si toosa uga baxayso muuqaal-aragga ee, [Including Samuel](#), **maalinta Isniinta, Oktoobar 28 saacadu marka ay tahay 5:30 PM waxaana lagu qabanayaa Tiyaatarka OMS! Empirical Theater**. Munaasbadan waxaa ka mid noqon doono filimka Dan Habib ee magaciisu yahay, "Including Samuel," iyo sheekeysii aad la yeelaneyso isaga iyo wiilkiisa.

Filimku wuxuu ka warbixin ka bixinayaa noloshu qoyska Habib ka dib markii wiilkooda Samuel laga helay xanuunka qofka muruqyadu shaqeyneyn (cerebral palsy) iyo sidii ay qoysku wax uga ogaan lahaayeen rajadda iyo wixii laga qaban karayo iyaga oo dagaal la galaya dhaqanka iyo caqabadaha dhaqameed sidii uu uga mid noqon lahaa. Waxaa laga siidaayey barnaamijka "All Things Considered ee raadiyaha NPR," "Good Morning America," sidoo kale waxaa lagu soo daabay joornaalada Washington Post iyo the Boston Globe, filimku dhawaan wuxuu ku guuleystay abbaalmarinta la yiraa Postive Images Media oo ay siisay TASH, koox caalamiya oo ay ka go'an tahay in dadka naafadda ahi ay dadka ka mid yihiin, iyo Abbaalmarinta Excellence Award' oo ay bixisay Superfest International Film Festival oo degan magaalada Berkeley, CA. Waxaad wax badan ka ogaan kartaa oo ku saabsan shaqada Dan Habib marka aad tagto shabakadani [on his website \(https://includingsamuel.com/\)](https://includingsamuel.com/).

Shaqaalaha, qoysaska, iyo xubnaha bulshadu dhammaantood waa ka soo qeybgali karaan. Goobaha baabuurta la dhigtaa waa lacag la'aan iyada oo sidoo kalena ka soo qeybgalayaasha la siin doon cunto fudud. Waxaan rajeyneynaa inaan halkaas kugu aragno!

Si Diiran,

Kooxda Waxbarashada Gaarka ah ee PPS

Doorakayaga, Shaqadayada, Caruurteena!

[Fayl ay ku jiraan macluumaad munaasabada oo ku qoran dhammaan luqadaha](#)